

Judkins Park: Dhageysiga Dadweynaha ee Aaga Baarkinka xaddidan

Faahfaahinta Dhegaysiga Dadweynaha ee fogaanta ah:

- Taariikhda: Sebtember 25, 2024
- Waqtiga: 6 PM

Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxay qaban doontaa dhageysi dadweyne oo fogaan ah oo ku saabsan qorshahayaga baarkinka cusub ee agagaarka saldhigga tareenka mustaqbalka ee Judkins Park. Waxanu sharxi doonaa qorshahayaga, waxaan ka jawaabi doonaa su'aalahaaga, waxaanu dhagaysan doonaa fikradahaaga.

Si aad wax badan uga ogaato oo aad iskaga diiwaangeliso dhageysiga, booqo xiriirkan: www.seattle.gov/transportation/judkinspark

Sababta aan ugu baahanahay Qorshe Baarkin Cusub

Saldhiga tareenka fudud ee Judkins Park waxaa la qorsheeyey in la furo dabayaaqada 2025. Waxaan rabnaa in aan yarayno baarkinka dadka ee maallinta oo dhan meelaha u dhow Saldhiga tareenka fudud. Tani waxay caawin doontaa hoos u dhigida qiiqa kaarboonka, wasakhawga hawada, iyo ciriiriga Baabuurta. Waxaan rabnaa inaan sameyno waxyaabaha soo socda:

- In aan dhiiri geli socodka, baaskiil wadida, iyo isticmaalka gaadiidka dadweynaha
- Mudnaanta baarkinka siino dadka deegaanka
- Siino baarkin muddo-gaaban dadka soo booqda meheradaha, dugsiyada, iyo jardiinooyinka



Waxa aan kaa maqalnay

Bishii Febraayo, waxaan wadaagnay qorshahayagii hore waxaana kugu weydiinnay ra'yi-celintaada sahan online ah.

- 84% Dadku waxay taageeraan yoolalkayaga mashruuca.
- 75% dadka deegaanka ayaa ku heshiiyey abuurista Aaga Baarkinka xaddidan.

Iyada oo ku saleysan ra'yi-celintaada, waxaan hagaajinay qorshaha. Aagga waqooyi ah ayaannu ku balaadinay hal Blog, waxaan soo jeedinaynaa hal aag oo weyn halkii ay ka ahaan lahayeen laba yar yar.



Seattle
Department of
Transportation




Qorshahayaga La-soo-jeediyay

- Waxaan soo jeedinaynaa Aag Baarkinka Xaniban (RPZ) oo cusub oo ¼-mayl u jira saldhigga mustaqbalka. Calaamaduhu waxay ku xadidi doonaan baarkinka ilaa 2 saacadood laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha, ilaa aad Permit haysato mooyaane.
- Inta lagu jiro maalinta waxaan soo jeedineynaa xaddidaad baarkin oo 2- ama 4-saac ah, barkinadaas oo ku xiga meelaha aan la degganeyn sida meheradaha, dugsiyada, kaniisadaha, iyo jardiinooyinka.
- Waxa aanu qorshaynaynaa in aanu samayno goobo cusub oo wax laga raro meelaha looga baahan yahay in si fudud looga raro loona dejiyo dadka iyo alaabaha.
- Waxaan sidoo kale qiimayn doonaa xaaladaha waddooyinka, waxaan xaddidi doonaa baarkinada u dhow isgoysyada iyo Jid goynta haddii loo baahdo si aan u hubinno in darawallada iyo dadka lugeynaya ay is arki karaan.

Fikirkaaga la wadaag

Dhageysiga ka hor, ama haddii aadan awoodin inaad ka soo qeybgasho dhageysiga, waxaad la wadaagi kartaa su'aalahaaga ama fikradahaaga adigoo email noogu soo diraya JudkinsParkLR@seattle.gov ama wac 206-615-0479.

Jawaabtaadu aad bay muhiim noogu tahay. Waxaan rajaynayna inaan ku maqalno!



 Gelitaanka Saldhigga

 Aag La Soo Jeediyay ee Isbeddellada Baarkinka Waddada

 Qaybta RPZ 17 waxay ku dari doontaa RPZ cusub